NIDAAMKA KU-DEJINTA/KA-QAADIDA MEEL KALE
XAANSHIDA XAQIIQADA

2007-2008

Barnaamijka Ku-Dejinta/Ka-qaadida waa la sii wadayaa inay bixiso Waaxda Dugsiyada Dadweynaha Boston sanad dugsiyeedka 2007-2008. Barnaamijka Ka-qaadida/Ku-dejinta Meel Kale wuxu u ogaalanayaa waalidka codsashada "meel kale" ee bas ku qaadida iyo ku dejinta ardayga meesha ama meel u dhow halka laga bixiyo xanaano maalmeedka ama barnamijka dugsiga kahor/kadib. Ardayda barnaamijyada xanaanada ilaa fasalka sideedaad waa u qalmaan adeegan hadii basasku u adeegaan dugsiyadooda. Adeegan waxa kalee loo fidinayaa ardayda ku jira dugsiyada gaar loo leeyahay, kuwa diineed, inyo kuwa rukhsada (Charter) hadii ay raacaan basaska Dugsiyada Dadweynaha Boston. Waxa kalee adeegan dalban kara ardayda aan u qalmin gaadiid ka soo qaada ama geeya guryahooda.

Fadlan ogow barnaamijka Ku-dejinta/Ka-qaadida Meel Kale maaha adeeg laguugu ballan qaadayo wuxuna ku xiran yahay shuruudaha soo socda:

- Meesha joogsiga basku waa inay ku taal dariiq basku sii maro oo soo maro ilaa dugsiga oo jirta waana inaan waqti ku darsamin maritaanka wadadaas ama aan basku ka daahin ku noqoshada geereshka marka maalintu dhamaato.

- Waa in baska meeli ka banana tahay si meelaynta loo joogteeyo.

- Adeega meel ka duwan waxa loo fidinayaa joogsiga baska ee kala goysyada. Adeega irid-ilaa-irid waxa loo fidiyaa oo keliya ardayda waxbarashada gaarka ah taasoo ka mid ah baahidooda xagga qiimaynta "IEP".

- Waaxda Gadiidku kuma ballan qaadayso in ilmahaagu helayo adeegan ama joogsasho meel kale oo gaar ah ood codsato. Waaxdu waxay u baahan kartaa bixinta joogsasho ka fog meesha xanaano maalmeedka sida loo codsaday.

- Ha codsan gaadiidka meel kale adoo doonaya in laguu bedelo joogsiga baska hadaad guurtey ama rabtid joogsi ka dhow. Waaxda Gadiidka ee 26 Court Street kama shaqayso wararka "bedelaada cinwaanka". Waa inaad tagtaa Xarunta Waxtarmada Waalidka hadaad rabto inaad bedesho cinwaankaaga. Markaad u dhiibto "bedelaada cinwaanka" Xarunta Waxtarmada Waalidka, markaas kadib ayaa Waaxda Gaadiidku siinaysaa ilmahaaga adeega gaadiid ku haboon iyadoo la raacayo nidaamka u yaal.

- Ardayda u guura aag dugsiyeed kale laakin raba inay ku sii jiraan dugsiyada ay hada ku jiraan UMA qalmayaan Gaadiidka Meel Kale.

Waalidka waxa lagu adkaynayaa:

- Inay mas'uul ka yihiin geynta ilmahooda ilaa meesha kale, hadii ilmaha laga qaadayo meeshaas dugsiga kahor, ama min meesha kale hadii ilmaha lagu dejinayo meeshaas dugsiga kadib.

- Iyadoo laga yaabo in ciyaal badan oo isticmaala barnaamijka Ku-dejinta/Ka-qaadida Meel Kale ay joogaan xaafad ayan aqoon, Waaxda Waxbarashadu waxay waalidka ku boorinaysaa inay u raadiyaan ilmaha qof weyn oo geeya meesha Ka-qaadida Kale kana qaada meesha Ku-dejinta. Waalidku waa inay kale ee hubiyaan in ilmuhu garan karo si loo tago ama looga yimaado meeshaas hadii qof weyn loo waayo.

- Gaadiidka meesha kale waa shan casho usbuucii. Ardayda barnaamijyada Bilowga Ubadka, ee afar casho wiigii kulma, waxa la siinayaa adeeg ku dhisan afar-casho-wiigii.

- Adeega Ku-dejinta/Ka-qaadida Kaduwan waa la baxshaa maalmaha goor hore dugsiga laga baxo. Waalidku waa inay hubiyaan in kuwa xanaano maalmeedka iyo barnaamijyada kale bixiyaa ay maalmahaas ilmaha u furan yihiin.

- Ardayda SOCOTADA ah, ee aan u lahayn adeega gaadiidka tegida/kaimaadka dugsiga si joogto ah, waa u qalmaan barnaamijkan sida kuwa raaca basask: helitaanka kuraas madhan ee basaska wadada mara ayay ku xiran tahay. Meesha la codsaday ee laga bixiyo barnaamijka/ xanaano maalmeedka waxay ku ooli kartaa meelaha jira ee dugsiga looga lugeeyo.

- Ku meelaynta ardayda adeegan waxa bilaabaya Waaxda Gaadiidka marka dugsiyada la furo. Codsiyada la sameeyo kadib marka dugsiga la furo waxa ugu horayn farsamaynaya Maamulha Dugsiga ilmuhu dhigto, waxana dhamaynaya Waaxda Gaadiidka, iyadoo la isticmaalayo shuruudaka kor ku xusan. Go'aamadu waxay ku SALASAN YIHIIN SIDA LOO SOO KALA HOREEYO, maamulaha ayaana habaynaya liiska sugidda.

- Hadii waalid guuro iyagaa ka mas'uul ah inay buuxiyaan codsi kal ee kaduwan.

- Marka waalidka, shaqaalaha dugsiga ama shaqaalaha xarunta xanaano maalmeedku uga baahdaan gacansiin Waaxda Gaadiidka ama Boliiska Dugsiga, waxa laga heli karaa lambarradan soo socda:

    - BoliiskaDugsiga/Nabadgelyada 617-635-8000
    - Waaxda Gaadiidka 617-635-9520

DUGSIYADA DADWEYNAHA BOSTON– WAAXDA GAADIIDKA

ARJIGA GAADIIDKA KADUWAN / KACAFINTA QAANTA

MAGACA DUGSI_____ SUMAD DUGSI # _____

MAGACA ARDAY_____ ARDAYGA "ID"# _____

CINWAANKA GURI_____ TAARIIKH DHALASH0_____/_____/_____

TELEFAN GURI ( )_____ TELEFAN GACAN ( )_____ DEGDEGA ( )_____

BASKA HADA # (AR)_____ (GAL)_____JOOGSIGA BASKA HADA_____

MAGACA WAALID_____

Fadlan sax adeega (-yada) kaduwan.

[ ] MEESHA KADUWAN EE LAGA QAADAY MARKA LOO SOCDO DUGSIGA

[ ] MEESHA KA DUWAN EE LAGU DEJIYEY MARKA LAGA YIMAADO DUGSIGA

FADLAN FIIRI: Gaadiidja ka duwan laguma balan qaadayo wuxuna ku xiran yahay helida kursi iyo shuruudaha wadada.

MAGACA RUGTA DARYEEL MAALMEEDKA
AMA QOFKA FIDIYA DARYEEL MAALMEEDKA_____

CINWAANKA RUGTA AMA QOFKA
DARYEEL MAALMEEDKA_____
(Waa inuu ka duwan yahay kan guriga) (#-ka wadada) (Magaca Wadada) (Xaafada Magaalada)

MAGACA DARYEEL MAALMEEDKA
QOFKA BIXIYA_____ TELEFAN
LAMBAR(____)_____

MAGACA QOFKA (HADUU JIRO) KULA KULMAYA
ARDAYGA MEESHA BAS JOOGSIG_____

KOONAHA LARABO EE
JOOGSIGA_____
(Waaxda Gaadiidku waxay ku qori kartaa bas joogsi kale si codsiga loo fuliyo.)

FADLAN FIIRI: HADII LA ANSIXIYO MEEL KA DUWAN EE LAGA QAADO AMA LAGU DEJIYO, BAS JOOGSIGAAS OO QUDHA AYAA ARDAYGA LAGU QORAYAA. HADII SIYAABO GAAR AH OO KALE LOO BAAHDO SIDA MAALMAHA GOOR HORE LA SII DAAYO AMA MAALMAHA QOFKA DARYEELKU QAABILI KARI WAAYO ARDAYGA, **WAALIDKA AYAA KA MAS'UUL AH U DIYAARINTA GAADIIDKA.**

KACAFINTA QAANTA (Waa in la Akhriyaa oo la Saxeexaa)

Codsiga iyo ansixinta gaadiidkan kaduwan, waxay waalidiintu/koriyeyaashu aqbalayaan wixi mas'uuliyad ah oo dhan xaga nabadgelyada ardayga inta ka horaysa fuulida baska iyo inta ka danbaysa marka baska dusiga laga dego. Gudiga Dugsiyada Boston walaa qof kasta oo u shaqeeya Gudiga Dugsiyada Boston ayaa hubinaya in ardayga uu la kulmay qof xilkas ah oo weyn ama in ardaygu garanayo rugta daryeel maalmeedka ama siduu meeshaas u tegi lahaa bas joogsi kadib. Waalidiinta/koriyeyaashu waxay aqbalayaan inayan ku dacwayn Magaalaweynta Boston ama Gudiga Dugsiyada ama shaqaalahooda ama wakiiladooda wax alla wixi dhaawacyo ah nooc kastaba, ama geerida kasta ee ardayga ku timaada oy sababtay Gaadiidka Kaduwan Meesha laga Qaado ama lagu Dejiyo. Waalidku wuxu kalee aqbalayaa inaan ardaygu ku dacwayn Magaalaweynta Boston ama Gudiga Dugsiyada ama shaqaalahooda ama wakiiladooda wax alla wixi dhaawacyo ah nooc kastaba, ama geerida kasta ee ardayga ku timaada oy sababtay Gaadiidka Kaduwan Meesha laga Qaado ama lagu Dejiyo. Waalidiinta/koriyayaashu waxay kalee ku balan qaadayaan inay u soo celiyaan wixi lacag ah ee Magaalaweynta Boston ama Gudiga Dugsiyadu ku bixiyaan dhaawac ama geeri ku timaada ardayga ee ka dhalata Kaqaadid ama Kudejinta Meesha Kaduwan. Waalidiintu/Koriyeyaashu ma cafiyeyaan xuquuqda ay u leeyihiin inay dacweeyaan Magaalaweynta Boston, Gudiga Dugsiyada, saraakiishooda, wakiilada, shaqaalaha, ama shirkadaha basaska wixi kale ay u qabaan.

_____ _____
Saxeexa Waalidka/Koriyaha **Taariikh**

TRANSPORTATION DEPARTMENT USE ONLY / WAAXDA GAADIIDKA OO QUDHA AYAA ISTICMAALAYA

DATE RECEIVED: _____ DATE PROCESSED: _____ Effective Date: _____

APPROVED [ ] NOT APPROVED [ ] Reason _____T.O_____